






SHURUUDAHA BOOQASHADA

Children's
MINNESOTA

Heerka 0 Shuruudaha booqashada (oo la adkeeyey)

Iyadoo laga jawaabayo korona faayrus ama COVID 19 oo dunida dhan saameeyey, laga bilaabo 10-ka Maajo, 2020, iyo ilaa aan soo saarno ogeysiis kale, shuruudaha soo socda ayaan sameynay si aan u difaacno bukaanka, qoysaska, dadka booqashada ku yimaada iyo shaqaalaha.

1. Masuulka sharciyeysan mar kasta ayey imaan karaan oo looma tixgelinayo sida dadka booqashada ku imaanaya.
2. Laba masuul oo sharciyeysan oo joogto ah ayaa la joogi kara qolka ilmaha bukaanka ah inta la daaweynayo. Haddii uu jiro hal masuul oo sharciyeysan oo keliya, waxa uu qofkan keensan karaa hal qof oo kale oo si joogto ah ula jooga inta ilmaha la daaweynayo.
3. Lama oggola dad kale oo booqasho ku imaanaya, oo walaalaha ayaa ka mid ah. Waxaa macquul ah in dadka qaarkood laga yeelo booqashada, laakiin dadkaasi waa in ay kala hadlaan Maamulaha Daryeelka Bukaanka (Patient Care Manager) ee qeybta ay u socdaan.
4. Labada masuul ee la soo oggolaaday waxaa khasab ah in maalin kasta la baaro caafimaadqabkooda. Waxaa labadana la siin doonaa waraaq magacoodu ku qoran yahay oo midabkeedu yahay cagaar, jaalle ama guduud. Faahfaahinta waraaqaha magaca:
 -  Cagaar — Booqashada bukaanka oo aan la iska rabin maasgaro
 -  Jaalle — Booqashada bukaanka oo la iska rabo in la xirto maasgaro
 -  Guduud — Booqashada goobaha bukaanka lama oggolaan karo, oo weliba maasgaro waa in la xirto
5. Labada masuul ee la soo oggolaaday booqashada looma diidayo iyagoo qaba calaamado fudud oo ah neefmareenka, laakiin maasgaro ayaa khasab ku ah.
6. Qof kasta oo aan wadan waraaq midab keh looma oggola booqashada goobaha daryeelka bukaanka.
7. Labada masuul ee la soo oggolaaday waxaa laga rabaa in uu gacmaha ku nadiifiyo goobta lagu hubiyo caafimaadqabka ka hor intaysan soo gelin qolka ilmaha.
8. Labada masuul ee la soo oggolaaday waxaa loo sheegi karaa in ay maasgaro qaataan inta ay dhex joogaan isbitaalka ama marka ay booqanayaan ilmahooda.
9. Shaqaalaha waxaa laga yaabaa in ay iyagu maasgarada u xirtaan naftooda ama baqqabidda bukaanka.
10. Labada masuul ee la soo oggolaaday isbitaalka waa laga saari karaa haddii ay raaci waayaan shuruudaha iyo maasgarada marka laga rabo.